

ISKU-CIRIRINTA SEATTLE: CUTUBKA 2

SOMALI

U diyaargarow basas oo ka soo baxaya ama joojinaya in ay isticmaalaan Jidka Dhulka Hoostiisa Mara ee Bartamaha Magaalada Seattle marka ay taariikhdu tahay 23ka Maarso, 2019.

- Jidka dhulka hoostiisa mara waxaa si joogto ah u adeegsan doona keliya tareenka fudud Link light rail.
- Haddii baska aad raacdo uu dhulka hoostiisa mari jiray, baska waxaa uu hadda ku socon doonaa ama mari doonaa jidadka 2nd, 3rd, 4th, 5th, ama 6th Ave.
- Waddooyinka dhulka hoostiisa mara ee degmada King County ee 41, 74, 101, 102, 150, 255, iyo Waddooyinka Basaska Xawliga Sare ku socda ee Sound Transit Express 550 ayaa la saameeyaa. Guud ahaan, 15 waddo oo basasku ay maraan ayaa beddelaya jidadka ay adeegsadaan.
- Waxaan ka sameynaynaa marin basasku ay maraan keliya goorta adeegsiga ugu sarreeyo oo cusub jidadka 5th iyo 6th ee bartamaha magaalada.
- Horay u qorsheeyo oo u diyaargarow isbeddelada waddadaada haddii aad gaadiid bulsho u raacdo ama gaari u wadato bartamaha magaalada.



Booqo www.seattle.gov/traffic si aad wax walba ula socota #SeattleSqueeze

Ogow

1. Isbeddelkan joogtada ahi waxaa loo sameeyay in la isku xiro tareenka Bari ee East Link light rail ee cusub ee ka imaanaya bartamaha magaalada Seattle iyo dhanka bari (Eastside) sannadka 2023 iyo martigelinta ballaarinta Xarunta Shirarka ee Gobolka Washington. Isbeddelkan wuxuu xaqiijin doonaa in la helo adeegga tareenka fudud ee xawliga ku socdo oo la isku halleyn karo.
2. Basaska kale ayaa sidoo kale beddeli doona waddooyinka ay adeegsadaan - fadlan horay u qorsheyso waxaadna oggaataa waddadaada cusub ka hor 23ka Maarso.
3. Si aad u dedejiiso in aad basaska ka soo fuusho waddada 3rd Ave iyo meelaha uu baska istaago ee Waddada Westlake Ave N, taabo kaarkaaga ORCA ka hor inta aadan fuulin baska waxaadna ka soo fuushaa albaab kastoo furan. Xasuusin: Waddada 3rd Ave waxaa loo qabtey in ay adeegsadaan keliya basaska min 6 AM - 7 PM, toddobo maalmood toddobaadkii.
4. Isbeddelkan wuxuu qayb ka yahay #SeattleSqueeze, muddada shanta sano ee soo socota iyadoo mashaariicda dhismaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ay culays soo saari doonaan nidaamka gaadiidkeenna, iyaga oo beddelaya sida aan ugu socdaalno gudaha iyo hareeraha magaalada Seattle.
5. Horay u qorsheyso oo waqti dheeraad ah qaado si aad u gaarto meesha aad ku socoto, haddaad ku socdaaleyso baaskiil, mooto, bas, gaari, gaari xammuul, ama nooc kale oo gaadiid ah.

Diyaar u Noqo

Waad ku mahadsan tahay in aad beddeshay hab socdaalkaaga intii lagu guda jiray muddada sadex toddobaad ee uu SR 99 xirnaa bishii Jannaayo 2019. Waxaan ku talinaynaa in isbeddeladaasi aad ka dhigto kuwo joogto ah! Halkan waxaa ku qoran talooyin kale oo kugu caawinayo in aad horay u sii socoto.

1. Haddii waddadaada baska ay guureyso, halkan ka raadi boosteejadaada baska ee cusub kingcounty.gov/metro.
2. Waqti hore ama waqti dambe bax oo ku raaxayso ganacsiyada iyo waxyaabaha soojiidashada leh ee bartamaha magaalada Seattle!
3. Ka fogaaw in aad gaari wadato haddii ay suurtagal tahay. Isku-day noocyo gaadiid kala duwan, sida bas, baaskiil, ama tareen.
4. Filo waqti socdaal dheeraad ah, oo muuji sabar iyo dabacsanaan.
5. Noo sheeg su'aalahaaga iyo fikradahaaga.
6. Booqo www.seattle.gov/traffic si aad wax walba ula socota #SeattleSqueeze